IS WEYDAARKA AMA ISKU BADDELKA AFKA HOOYO IYO AFKA ISWIDHISHKA

Horumarinta cilmiga iyo luqadda ee loogu talo galay carruurta iyo dhallinyarada ku hadashada luqadaha badan

VÄXELVIS PÅ MODERSMÅL OCH SVENSKA

somalisk version

MYNDIGHETEN FÖR SKOLUTVECKLING

Luqaddaydu way sii kobcaysaa

Ilmaha loogu yeedho afkiisa hooyaa wuxuu maqlaa erayo badan. Erayada intooda badan ilmuhu dib ayuu ka gartaa oo wuu garanayaa micnahooga. Wuu fahmayaa in ayey hooyo iyo ayey aabbo ay joogaan guriga, in kasta oo aanu iyaga arag. Wuxuu ku faraxsan yahay in jallaato la siin doono. Waxaanu baranayaa sida wax loo guubaabiyo, sida weedh loo sameeyo iyo sida loo dhiso su'aal afka hooyo ah.

Waa sidaa sida aannu u baranaa qawaaniinta xagga naxwaha marka aynnu carruurta nahay. Carruutu wax bay dhageystaan oo ay ku celceliyaan, degdegna waxay u dhisaan weedhaha iyo tacbiiraha ka turjumaya fikirkooda iyo waxyaabaha ay rajeynayaan.

Cilmigaas carruurtu waxay u turjumi karaan xaalado ama arrimo af iswidhish ah, marka ay bartaan erayada iswidhishka oo ay u baahdaan in ay dhisaan dhismay-aasha xagga naxwaha iswidhishka ah ee u dhigma.

* Cali Xasanow, kaalay immika waynnu cuntaynaynaa eh! Cuntadii waa diyaar, awow hooyo iyo ayey hooyo labadiiba way yimaaddeen. Ma dooneysaa jallaato cuntada dabadeed?

VÄXELVIS PÅ MODERSMÅL OCH SVENSKA
Beställningsnummer U06:152
ISBN 978-91-85589-11-1
Liber Distribution, 162 89 Stockholm
Telefon 08-690 95 76
Fax 08-690 95 50

Text: Mai Beijer
Grafisk formgivning: Typisk Form designbyrå
Översättning och grafisk produktion: Ord & Stil AB
Illustrationer: Burhan Misirli
Tryck: Intellecta Tryckindustri, Solna 2006
Myndigheten för skolutveckling 2006
www.skolutveckling.se

Waxaynnu baran karnaa luqado badan

Iswidhan qarnigii 21naad waxaynnu ku hadli jirney luqado fara badan. Carruur badan ayaa qoysaskoodu noqonayaan kuwo luqado badan ku hadla. Dugsiyada xannaanada iyo dugsiyada kale ee caadiga ahba badanaa waxa lagula kulmaa carruur iyo dad waaweyn oo luqado badan ku hadla. Sida fiican ee dugsiyada xannaanada iyo dugsiyada kale ee caadiga ahi ay uga war hayaan ama u ilaaliyaan luqad badnaanta carruurta iyo dhallinyarada ayaa muhiimad weyn ku leh horumarka carruurta ee xagga aqoonta iyo nasabkoodaba.

Waxaynu baran karnaa luqad cusub iyada oo aynaan gelin kharash luqadeed oo kale. Aqoonta ay ardayaha luqadaha badan ku hadlaan ku leeyihiin afkooda hooyo lama barbar dhigi karo aqoonta luqadeed ee dadka intooda badani ku hadlaan iswidhishka. Dhanka kale- luqadi waxay dhashaa luqad! Micnaha eray ee aynnu luqad ku naqaanno, waxaynnu u qaadan karnaa luqad kale isla marka aynnu baranno waxa lagu yidhaa luqadda kale ee cusub. Marka qudha ee loo baahdo in la turjumo fahan caan ah oo la yaqaan ayaa si fudud u go'aamisa, marka la barbar dhigo haddii ay qasab inagu tahay in aynnu helno cilmi cusub, marka sharraxadda aynnu helno ay keento eray aynaan garanayn. Waa innaga dadkeenna waaweyn-waalidiinta, macallimiinta, cilmi baadhyaasha, fikrad dhisayaasha iyo go'aan gaadhayaasha- kuwa go'aaminaya fursadaha ay helayaan carruurta iyo dhallinyada luaqadaha badan ku hadasha si ay hore ugu mariyaan aqoonta iyaga oo gargaarsanaya oo is dhaafsanaya luqadahooga kale duwen ee ay ku hadlaan.

Ujeeddada laga leeyahay waraaqahan ama buuggan yari waxa weeyi in la muujiyo sida dugsiyada xannaanada iyo dugsiyada kale ee Iswidhan ay doonayaan in ay u taageeraan carruurta iyo dhallinyarada ku hadla luqado badan horena ugu marin lahaayeen luqadahooga isla markaana u heli lahaayeen cilmi cuusub. Warbixinta ku saabsan meesha laga helayo macluumaadka lagu sheegay waraaqahan ama buugan yari waxay ku yaallaan oo laga helayaa *qaybaha (linkiyada) iyo sugganaha* ku yaalla bogga ugu horreeya.

Iyada oo luqadda la adeegsanayo ayeynnu cabbiri karnaa ama sheegi karnaa dhaqamadeenna iyo waxyaabaha aynnu qiimaynayno. Luqaduhu waxay sidaan cilmiyada waxayna sal u yihiin la kulanka dadyowga kale. Waxaynu u baahnahay luqado si aynu u fikirno, u hammino, oo qaab ugu samyno su'aalaha una xallilno dhibaatooyinka. *Luqadaha badani waxay keenaan fursado badan!*

Isha oo aan shay yar lagu xidhin



Way adagtahay in la qiimeeyo masaafadda haddii qofku doonayo in uu kubbed laago iyada oo uu shay yar isha uu ku xidhan yahay. Labada indhood oo caafimaad qaba kuma aragno labanlaab ee weaxynnu ku aragnaa uun wax dheeraad ah!

Tani waxay la mid tahay xaaldda ilmaha luqadaha badan ku hadla. Qofku marka uu isticmaalo labada luqadood ee uu yaqaanno waxay keenayaan waxyaabo badan iyo fursado qoto dheer oo hore u mariya aqoontiisa.

Laakiin carruurta ku hadasha luqado badan had iyo jeer uma fududa dugsiyada iswidhishku. Xitaa haddii qaar badani ay arrintaas ka baxaan, waxa jira qaar kale oo aan gaadhi karayn hadefkii cilmiyeed ee la lahaa. Waxa jira dhowr arrimood oo isku xidhan oo arrintaa u sobob ah. Mid ka mid ahi waxa weeyi wax dhigista lagu dhigo afka hooyo oo laga dhimay dhammaan nooc kasta oo dugsi 10-15kii sannadood ee ugu dambeeyey dhexdooda.

Qaar badan oo ka mid ah degmooyinka ayaa gebi ahaanba la joojiyey taageeradii luqadda afka hooyo ee dugsiyada xannaanada. Dhimistaa la dhimay luqadda hooyo kumay xidhnayn is waafajinta cilmiga korinta iyo rabbaynta, dugsiyada xannaanada waxa la ogaa iyada oo la adeegsanayo waaya aragnimadii laga lahaa in dadaalka taageerada ah ee hore loo geliyo luqadda iyo cidda qofku uu yahay ay si gaar ah muhiim ugu yihiin carruurta ay ad'doodu hoosayso. Laakiin degmooyinka ayaa u baahday in ay lacag kaydsadaan.

Qaar badan oo degmooyinka ka mid ah ayaa jadwelkooda ku daray qayb weyn oo ah wax dhigista luqadda afka hooyo taas oo la dhigo gelinka dambe ee galabtii. Taasina waxay keentaa in arday aan badnayni ay doortaan in ay dhigtaan luqaddooda hooyo. Marka la dhigayo luqadda hooyo ee macallimiinta iyo ardayda kaleba ay maalinimada rawaaxaan ee ay hooydaan, kolkaa dugsigu wuxu luminayaa aqoontii iyo xirfadihii dhaqamada kala duwen ee luqadda afka hooyo ay lahayd. Taasina waxay keenaysaa in xaaladda aqoonta dhaqameed ee kala duwen ee ardaydu ay hoos u dhacdo isla markaana macallimiinta afka iswidhishka ay ku timaaddo xaalado xun oo ay kula kulmaan baahida ardayda.

Yaraynta ama hoos u dhigga xilligan la yareeyey sida "shaqaalaha caafimaadka ardayada" –la taliyayaasha, kalkaalisooyinka caafimaadka ee dugsiyada, dhakhaatiirta cilmi nafsiga- arrinaasi waxay si gaar ah dhibaato adagi uga soo gaadhaysaa ardayda xagga maskaxda wax ka qaba ama ku nool badbaado la'aan, taas micnaheedu waxa weeyi in aan la ogaan haddii qofka loo oggol yahay in uu joogayo Iswidhan. Dhinacyo badan ayaanay ardaydaasi u helin taageeradii ay u baahnaayeen si ay u sii wadan karaan horumarka aqoontooda.

Dugsigu wuu sii fiicnaanayaa

Dawladdu waxay go'aamisay in daadaal ama dhaqaale dheeraad ah ay geliso si ay u caawiso degmooyinka iyo dugsiyada si ay u sii fiicnaadaan oo ay u waajahaan baahida gaarka ah ee haysata ardayda luqadaha badan ku hadasha. Dhammaan ardaydu waxay xaq u leeyihiin shuruudo isku mid ah si ay u gaadhaan hadefka cilmiga la leeyahay ee dugsiga hoose dhexe isla markaana ay si buuxda ula socdaan wax barashooyinka dugsiyada sare.

Hey'adda qaabbilsan horumarinta dugsiyada ayaa iyaga oo raacaya hawl ay dawladdu u dirtay ku shaqaynaya qorshe ah sidii lacagtan loogu isticmaali lahaa dadaallo taageero oo kala duwen:

- Maamulayaasha iyo dadka kale ee wax go'aamiya ayaa lagu marti qaadayaa waxbarashada arrimaha la xidhiidha ku hadalka luqadaha badan, marka laga eego la kulanka dhaqamada iyo wada shaqaynta ka dhaxaysa dugsiga iyo guriga.

- Macallimiinta iswidhishka ku hadasha ee maaddooyinka kale duwen u dhiga ardayda ku hadasha luqado badan ayaa macallimiintaas waxa la siinayaa waxbarasho si ay si fiican wax ugu dhigaan ardayda afka iswidhishku uu yahay luqadooda labaad.

- Macallimiinta dhiga luqadda afka hooyo waxa iyagana lagu marti qaadayaa wax barasho sidii ay hoggaamin fiican oo xagga maaddooyinka kala duwen u siin lahaayeen ardayda isla markaanaa ay maaddooyinka kala duwen ugu dhigi lahaayeen afka hooyo iyo afka iswidhishka.

- Degmooyinka waxa la siinayaa dhaqaale si ay u shaqaaleeyaan shaqaale dheeraad ah oo la geeyo dugsiyada baahi weyn u qaba shaqaale dheeraad ah.

- Degmooyinka waxa la siinayaa taageero si ay hore ugu mariyaan nidaamyada si ay u sii fiicnaato ilaalinta waayo aragnimada waalidiinta iyo sidii kor loogu qaadi lahaa fursadahooga sidii ay carruurtooda uga caawin lahaayeen horumarinta la xidhiidha cidda ay yihiin ama nasabkooda iyo cilmigooda.

- Degmooyinka waxa la siinayaa taageero si ay hore ugu mariyaan wax dhigista loogu talo galay ardayda Iswidhan sannadaddii ugu dambeeyey soo gashay dugsiyada hoose dhexe ama sannaddadii lagu dhex jirey dugsiyada sare.

- Ardayda luqadaha badan ku hadasha waa la guubaabinayaa si ay u sii wadan karaan waxbarashooyinkooda ka dambeeya dugsiga sare.

Qayb badan oo ka mid ah lacagta ay dawladdu ugu talo gashay dadaaladaas ayey u qaybiyeen hey'aduhu degmooyinka ku dhow 30ka degmo huwaas oo hadefka iyo xaqiiqada dugsiyada u dhaxeeya uu ugu dheeryahay. Sida lacagtaas loo isticmaalayo waxa go'aaminaya iyaga oo wada hadal la yeelanaya hey'adda qaabbilsan.

Waxbarashada macallimiinta dhigta luqada afka hooyo, dadaallada la samaynayo si loo xoojiyo wada shaqaynta waalidiinta, horumarinta waxbarashada ardayda dhawaanta timid iyo dadaalka sidii kor loogu qaadi lahaa danta ardayda ku hadasha luqadaha badan ee loogu talo galay waxbarashooyinka dugsiyada sare way khusaysaa dhammaan degmooyinka oo dhan.

Bogagga soo socda waxa lagu soo bandhigayaa sobobaha loo adeegsanayo dadaalladaas la wado.

Luqaddee ayaan ilmahayga sida ugu fiican ugu caawin karaa?



Ayaa hooyadan ku khaladay in " ay iswidhish kula hadsho" ilmaheega, maaddaama aqoonteeda af iswidhishu ay ku kooban tahay uun eraya kooban? Iyadu way iska dooneysaa –uun- laakiin waxa dhacayaa waxa weeyi in horumarka xagga luqadda ee ilmuhu ay daahayso. Ilmuhu wuxu baranayaa erayo kooban oo aan badnayn mana garanayo sida jumladaha loo dhiso. Arrintaasina waxay si ba'an u waxyeelaynaysaa horumarka xagga aqoonta ee ilmuhu uu sii wadan lahaa.

Waalidiinta is weydiinaya ee ku fikiraya luqadda ay kula hadli doonaan ilmahooga, waxay ka yeeli doonaan haddii ay jraan luqado badan oo qoyska dhexdiisa lagaga hadlo, haddii ilmuhu uu ka qayb qaadanayo waxbarashada afka hooyo ee dugsiga lagu dhigo iyo sida ay ilmaha uga caawin karaan horumarinta xagga afka iswidhishka, waxay jawaabta su'aalahooga ka helayaan buugga la yidhaa *(Två språk eller flera? Råd till flerspråkiga familjer) Ma laba luqadood mise luqado badan? Talada la siinayo qoysaska ku hadla luqadaha badan*. Macluumaadka ama warbixintu waxay ku qoran tahay afka iswidhishka iyo 16 luqadood oo kale, waxaanay warbixintaasi ku dhisan tahay waayo aragnimooyin laga helay qoysas badan oo ku hadla luqado badan. Waxaa ka soo shaqeeyey oo soo saaray rugta cilmi baadhista luqadaha ee ku taal magaalada Rinkeby iyada oo la kaashanaysa hey'adda horumarinta dugsiyada.

Dugsiga xannaanada iyo carruurta ku hadasha luqado badan

Qorshaha waxbarashada ee dugsiga xannaanada ee saldhigga u ah hawsha la qabanayo waxa ku yaalla,

> *"Dugsiga xannaanadu waa in uu ku socdaa ilmaha kasta ee luqaddiisa afka hooyo aanay ahayn iswidhish in uu hore mariyo dhaqankiisa qofnimo iyo awooddiisa xidhiighka afka iswidhishku in ay la mid noqoto sida afkiisa hooyo."*

Horumarka xagga qofnimada iyo luqadda qofku way wada socdaan oo way isku xidhan yihiin. Dhammaan carruurtu way ku farxsan yihiin in ay bartaan luqado kale isla markaana ay jaleecaan dhaqammo kale.

Qaar ka mid ah rugta kutubta ayaa laga helaa oo haya buugaagta carruurta iyo cajalado la qabtay oo xitaa ah luqado kale oo aan iswidhish ahayn oo qofku gurigiisa la tagei karo inta uu amaahdo. Hey'addu waxay waddaa baadhitaan ah qalabka si gaar ah ugu habboon hawlaha laga wado dugsiyada xannaanada iyo kolka guriga kor wax loogu akhriyayo. Warbixinta ku saabsan qalbaka noocaas ahi waxay soo baxaysaa oo la soo saarayaa xilliga dayrta ee 2006 dhexdeeda, waxaana laga helayaa hey'adda horumarinta dugsiyada bogga Internetka ee *Tema Modersmål* (www.modersmal.net)

Inanta haysta dhanqan kale oo aan iswidhish ahayn way ku faanaysaa marka ay maqasho sheeko ku saabsan waddankeedii hore ee ay ka soo jeeddey, taas oo weliba carruurta kalena ay u arkaan in ay tahay arrin xiiso leh. *Ka dibna ay gabadhaasi buuggaas u qaadato xagga gurigeeda dabadeed qoyskeeduna ay dhageystaan sheekada oo lagu duubay afkeeda hooyo!*

Luqadaha badan ee dugsiga xannaanada carruurta lagaga hadlaa waxay keenaan fursado badan

Awood ooiskuday in aad hadasho, Carruuta dhigata dugsiga xannaanada carruurta ee ku hadasha luqadaha badan (Komma till tals. Flerspråkiga barn i förskolan) waa qoraal faallo ah oo ay bixiso hey'adda qaabbilsan horumarinta dugsiyadu. Halkan waxa lagu soo bandhigayaa fikradaha ku saabsan sida dugsiyada xannaanadu ay u waajahayaan carruurta ku hadasha luqado badan isla markaana loo taageerayo luqadaha kala duwen ee ay ku hadlaan.

Luqaddu kor ayey u qaaddaa- Qiimaynta lagu sameeyey koboca ama horumarka luqadda ilmaha

Way adkaan kartaa in la go'aamiyo inta ay leegtahay luqadda iswidhishka ah ee uu karayo ilamaha luqadaha badan ku hadlaa. Ilmuhu wuxu bartay sidii uu ula qabsan lahaa habka ku dhawaaqa erayga, taasina waxay keenaysaa in waalidka iyo macallimiintuba ay qiimayn dheeraad ah ku sameeyaan aqoonta xagga luqadda ee ilmaha. Ilmuhu wuu hadlaa isaga oo luqadda aan jajebinin, laakiin luqadda ilmuhu run ahaantii miyey u kobocday si la mid ah sida carruurta ay isku da'da yihiin ee luqadooda hooyo tahay afka iswidhishka?

Ilma kale ayaa u hadla si aad u yar. Marka guriga la joogo waalidiintu waxay aaminsan yihiin in taasi ay ku xidhan tahay in ilmuhu aanu si fiican u karayn luqaddiisa afka hooyo, laakiin waxay u arkaan in uu si fiican ugu hadlo luqadda iswidhishka. Dugsiga xannaada shaqaaluhu waxay aaminsan yihiin taa mid ka duwen oo ah in ilmuhu aanu karayn luqadda isiwdhishka, laakiin uu aad ugu fiican yahay luqaddiisa afka hooyo.

Waxa jira siyaabo loo baadho oo lagu ogoodo halka uu yahay habka horumarka luqadda ee illma luqado bodan ku hadlaa. Iyada oo la adeegsanyo shaybaadhka warbixineed ee loo yaqaan *Luqaddu kor ayey u qaadaysaa*, *shaybaadhka warbixineed ee iswidhishka*, *iswidhishka oo ah luqadda labaad iyo luqadda hooyo ee loogu talo galay sannaddada ka horreeya sannad dugsiyeedka 6 (Språket lyfter*, *Diagnosmaterial i svenska*, *svenska som andraspråk och modersmål för åren före skolår 6)*, ayaa qiimaynaha noocaas ah la barbar wadi karaa afka iswidhishka iyo ilmaha afkiisa hooyo.

Aabbaha iyo hooyada waalidiintooda ayaa door wax ku ool ah ciyaari kara

Luqaddu waxay ka badan tahay erayo iyo qawaaniin naxw. Waxay xitaa taasi koobaysaa fikradaha, qiimaynaha, sida adduunka loo arko ee loo soo qaato aqoonta noocan ah ee layskula xidhiidhsiiyo iyada oo luqadda la adeegsanayo. Sida ilmuhu u waajaho aqoon cusub inta uu ku jiro sannaddada hore waxay raad ku yeelanaysaa oo ay wax ka baddelaysaa habka waxbarashadooda waxaanay cawaaqib weyn ku yeelanaysaa marka ay yimaaddaan dugsiga.

Awowgay hooyo wuxu ku faanaa jardiinadiisa yar. Wuxu bartay dhammaan magcayada qalabka jardiinada iyo sida loo qodo, sida loo beero iyo sida loo waraabiyo si ay u baxaan. Gabadha Mina waxay weliba awowgeed hooyo ka baratay muddeda ay qaadanayso inta caleemaha ugu horreeyaa aanay ka soo bixin dhulka. Waxay ka hadlaan in dadku ay dulqaad yeeshaan oo aanay quusanin. In la koraa wakhti ayey qaadanaysaa!

Ka sheekee sheeko! Sheekadaa mar kale ka sheekee!

Carruurtu waxay jecelyihiin in ay dhageystaan sheekooyinka. Carruur badan ayaa si gaar ah u jecel in ay dhageystaan sheekooyinka ku saabsan iyaga naf'ahaantoodu markii ay aad u yaraayeen ee ay sebiga ahaayeen. Sheekooyinka kale ee muhiimka ahi waxay ku saabsan yihiin markii hooyo iyo aabbo ay carruurta ahaayeen iyo wixii ay wakhtigaas qaban jireen. Sidii ay u ciyaari jireen iyo wixii ay adab darro ama dheel dheel samayn jireen. In si deggan wada hadal loo yeesho oo qofkuna is ahaantiis iskaga warramaa waxa weeyi hab carruurta u wanaagsan sidii ay uga shaqayn lahaayeen waxyaabaha dhaca maalintii.

Carruurta dhageysta sheekooyinka ku saabsan waalidiintooda aabbohood iyo hooyadood ee ku saabsan carruurnimadoodii waxa weeyi mid farxad ah. In qoyska dhaqankooda looga warramo oo looga sheekeeyaa micna weyn ayey ku leedahay horumarka qofahaaneed ee ilmaha soo koraya.

Xitaa carruurtu waxay jecelyihiin in ay dadka waaweyni wax u akhriyaan. Luqadaha qaarkood buugaagtu aad ayey ugu yaryihiin rukta kutubaha ee Iswidhan xitaa haddii rukta kutubaha qaarkood ay isku dayaan in ay soo iibsadaan. Mararka qaarkood haddana way iska fiican tahay oo waa wax soconaya "in wax lagu akhriyo luqadda afka hooyo, iyada oo dadka waawyni si degdeg ah ugu turjumayaan qoraalka iyada oo carruurta iyo dadka waaweyniba wadajir u daawanaya sawirrada ku yaalla buugga sayniska. Laakiin carruurtu aad ayey si taxaddir leh ugu fiirsan karaan haddii sheekada looga sheekaynayaa ay had iyo jeer isku mid tahay, maalinba maalinta ka dambaysa. Waxa loo baahan yahay in qofka weyni uu xusuusnaado wixii uu ku hadlay ee uu yidhi!

Sheekooyinka hooyadu waa kuwa xiiso leh oo khatar ah. Laakiin had iyo jeer waxay ku dhammaadaan si farxad leh!



Aqoon fiican oo afka iswidhishka ah sidii luqaddii labaad

Arday fara badan oo luaqado badan ku hadasha ayaa aqoon fiican u leh luqadda iswidhishka, qaar ka mid ahna waaba luqaddooda ugu adag. Qaar kalena waxay marka ugu horreysa luqadda iswdhishka ku arkaan dugsiga xannaanada ama dugsiga caadiga ah. Waayo aragnimooyinka laga dhaxlay dugsiyada Iswidhan ayaa muujinaysaa, in 1-2sannadood inta u dhaxaysa ay ku qaadanayso ardayda dhawaan yimid waddanka in ay heerka noocaas ah ee loo baahan yahay si ay xidhiidh ula samayn karaan saaxiibadooda isla markaasna ay ula socon karaan waxbarashada. Sida caadiga ah waxay qaadataa 5-6sannadood inta qofku aanu luqadda iswidhishku si fiican u baran sida ardayda ay luqadda iswidhku ugu tahay luqaddood hooyo. Waxaa jira waxyaabo reeban oo taas ka duwen. Ardayga aqoon fiican u leh luqaddiisa afka hooyo iyo xitaa luqadaha kale wuxuu si degdeg u bartaa luqadda iswidhishka. Ardayga ka yimid waddamada daggaaladu aafeeyeen ama ay dhibaatooyinka ka soo gaadheen masiibooyin ka kale wuxuu xilliyada qaarkood dhibaatooyin dheeraad ah kala kulmaa in uu wax cusub barto.

Aqoon fiican oo luqadda iswidhishka ahi waxay muftaax u tahay horumarka xagga waxbarashada ee xagga dugsiyada. Si qofku uu barnaamuj waxbarasho qaran uga sii wadan karo dugsiyada sare wuxu ardaygu u baahan yahay in uu gaadho shahaadedda ugu yar ee baasidda ee sannad dugsiyeedka 9 ee af iswidhishka ama iswidhishka oo luqaddii labaad ah.

Si fiican oo qofku uu luqaddiisa iswidhaka u sii wanaajin karaa waxa weeyi in qofku uu buugaagta akhristo. Qofka shaqaalaha ah ee jooga rukta kutubta ayaa ku siinaya talo buugaagta ku saabsan oo u dhiganta waxay xiisaynayaan carruurta iyo ardayduba.

Xarunta dhexe ee iswidhishka sidii luqadda labaad iyo afka iswidhka ee loogu talo galay dadka soo galeytiga ah

Xarunta dhexe ee afka iswidhishka lagu dhigo ee loo yaqaan "National cenrum" waxay ka shaqaysaa shaqooyin ay ka hesho dawladda. Meela ay xaruntaasi ka mas'uul tahay waxa ku jira hawlo ay ka qabato dugsiyada xannaanada ilaa luqadda iswidhishka ee loogu talo galay dadka waaweyn ee ajnabiga ah, iswidhishka loogu talo talo galay dadka soo galeytiga ah. Dhowr waxaadood oo muhiim ahi waxa weeyi:

- Fidinta aqoonta ku saabsan habka waxbarashada taas oo micnaheedu yahay in qofku uu barto luqad labaad.
- In la taageero habka shaqada ee lagu horumarinayo luqadda iyo aqoonta.

Xaruntaas dhexe waxay isku soo dubbariddaa siminaarada iyo shirarka, waxay soo saartaa buugaagta waxayna ka jawaabtaa xidhiidhada gaarka ah ee qofeed. Warbixin dheeraad ah waxaad ka helaysaa boggooda Internetka ee cinwaankiisu yahay www.lhs.se/sfi

Ogaanshaha hadefka ama ujeedada laga leeyahay dhigista afka hooyo

Golaha baarlamaanku wuxuu go'aamiyey in dhammaan ardayada afkooda hooyo aanu ahayn iswidhishku ay afkooda hooyo ku baran karaan dugsiga hoose ee aasaasiga ah iyo dugsiga sare. Halkan Iswidhan waxay raacaysaa heshiiskii qaramada Midoobey ee carruurta ku saabsanaa,

> *"Dawladiihii heshiiskaas ka qayb galay waxay ku heshiiyeen in waxbarashada carruurtu ay kor u qaaddo horumarka ixtiraamka carruurta ee xagga waalidiinta, dhaqanka ilmaha, luqaddiisa iyo xidhiidhka kale ee adduunka ama waxyaabaha kale ee ku wareegsan… "(Qodobka 29).*

Maaddedaasi waa mid qofku iskii u go'aansanyo ardaygu na waa in " uu yeeshaa aqoon" xagga luqadda ah. Degmooyinka ayaa ka mas'uul ah in ay ku marti qaadaan dhigista luqadda afka hooyo marka la tixraaco shuruudihii lagu sheegay ee lagu ansaxiyey nidaamka u yaalla dugsiyada hoose dhexe iyo dugsiyada sare. Waxa jira qorshayaal waxbarasho oo qarameed iyo shahaadooyin afka hooyo ah oo qiimo iyo khibrad la mid ah leh maaddooyinka kale marka ardaygu uu codsanayo dugsiyada sare iyo jaamicadaha.

Waa maxay sobobta qofku luqadda afka hoyo ugu dhiganayaa dugsiga?

- Aqoonta luqadda afka hooyo iyo asal ahaan dhaqanka uu qofku watey waxay keenayaan sidii loo heli lahaa horumar wanaagsan oo xagga dhaqamada ah taas oo micnaheedu ay tahay in ardaygu uu ka qayb qaato labada dhaqan ee bulshada kii uu asal ahaan u watay iyo ka mujtamaca uu la deggan yahay.

- Aqoonta xagga luqadda ee qofku leeyahay waa muftaaxa xidhiidhka. Luqadda afka hooyo waxay ilmaha ama ardayga fursad u siinaysaa in uu xidhiidh dhow la yeesho qoyskooda iyo eheladiisa kale ee deggan waddamada kale. Marka adduunku isku furmaba aqoonta xagga luqadaha kala duwen ee qofku leeyahay waxay faa'iido u tahay qofka naf'aahntiisa iyo Iswidhan labadaba. Wax dhigista ujeedadeedu waxay tahay in ay ardayga ka caawiso sidii uu u gaadhi lahaa laqaddiisa afka hooyo oo dhammaystiran, taas oo u suurta gelinaysa in uu adeegsado xitaa marka uu weynaado oo uu doonayo in uu sii wato waxbarashooyinkiisa xirfadeed ee Iswidhan ama waddamada kale ee dibedda.

- Luqaddu waa qalabka horumarka aqoonta. Haddii ardaygu uu luqadihiisa kale duwen ku adeegsado dugsiga, wuxu ardaygu kor u qaaday fursadihiisii uu ku heli lahaa aqoonta cusub ee maaddooyinka.

Rugta kutubta ee caalamiga ah

Rugta kutubta ee caalamiga ah ee ku taalla magaalada Istokhoom waxa yaalla qiyaastii 200 000 oo buug oo ku qoran in ka badan 100 luqadood. Halkaas xitaa waxa yaalla DVD- iyo cajaladaha filimka ee fiidiyowga oo laga keenay waddamo kala duwen iyo cajaladaha suxuunta wareegsan oo uu ku duuban yahay muusig kala duwen oo laga kala keenay adduunka oo dhan. Waxaad gashaa ama booqataa bogooda Internetka ee carabiga, ingiriisiga, shiinaha, iiraaniga, ruushka, isbaanishka iyo afka iswidhishka. Haddii aad haysato oo aad leedahay kaadhka wax lagu amaahdo ee laga bixiyo rugta kutubta ee magaalada Istokhoom, waxa naf'ahaantaadu aad buugaag ka amaahan kartaa rugta kutubta ee caalamiga ah ee ku taalla meesha u dhow Odenplan. Haddii aad deggan tahay meelo kale waxaad buugaagta ka dalban kartaa halkaas adoo soo maraya rugta kutubta ee ku taalla magaalada aad deggan tahay.
www.internationellabiblioteket.se

Mawdduuca luqadda afka hooyo www.modersmal.net

Internetka micnihiisu waxa weeyi horumarka aasaaska sidii hore loogu marin lahaa aqoonta luqadaha. Bogga Internetka ee hey'adda ee Mawdduuca Luqadda afka hooyo waxa qiyaastii ka shaqeeya 100 macallin oo dhiga 30 luqadood, oo aad ku helayso qaybo qoraal ah, sawirro iyo cod kuwaas oo ardayda iyo carruurtuba ay u adeegsan karaan sidii ay hore ugu marin lahaayeen luqaddooda. Qaar badan oo ka mid ah luqadahaas waxa jira fursado aad kula kala xidhiidhi karto macallimiinta, ardayda iyo waalidiinta.

Ardayada dhawaan waddanka yimid waxay doonayaan in ay ingiriisiga bartaan

Ingiriisu waa luqad muhiim ah oo dugsiyada iswidhishka looga yaqaan luqad asaasi ah oo muhiim ah. Taas micnaheeduna waxa weeyi in ugu yaraan ardaygu uu haysto shahaado uu ku baasay ama ku gudbay ingiriisiga sannad dugsiyeedka 9 si uu u siin wadan karo barnaamujkiisa waxbarasho ee guud ee dugsiyada sare. Ardaydu waxay bilaabaan waxbarashada ingiriisiga sannad dugsiyeedka 1 ama 2. Marka la sameeyo isbarbardhig caalami ah ayaa ardayda iswidhisku waxay ku jiraan heerka sare waxbarashada ingiriisga marka la eego ardayda ingiriisu aanu ahayn luqadooda afka hooyo.

Ardayda dhigata ee soo gasha mar dambe dugsiyada Iswidhan waxay yimaaddaan iyaga oo wata aqoon xagga afka ingiriisiga ah. Qaar ardaydaas ah ingiriisigu waa afkooda hooyo, qaar kalena waxay ku soo barteen dugsiyada ama waxay ku soo barteen qayb ka mid ah hab aan caadi ahayn, halka qaar kalena sideedaba aanay wax ingiriisi ah soo marin. Intooda badan ardayda dhawaan waddanka Iswidhan timid waxay jecel yihiin in ay bartaan afka ingiisiga. Arrintaasi waxay si gaar ah u khusaysaa dhallinyarada aan iyagu hubin in Iswidhan ay sii degganaanayaan.

Afka ingiriisugu waa maaddo khasab ah oo xitaa ardayda aan la socon "bilowgii hore" ay xaq u leeyihiin in ay dhigtaan. Ardayda intooda badani waxay leeyihiin awood ay ku bilaabaan afka iswidhishka iyo ingiriisiga iyaga oo isbarbar wada. Mararka qaarkood waxa dhici karta in labada luqadood ay isku dhacaan, tusaale ahaan in ardaygu uu ka garto dhismaha naxwaha ee iswidhiska ka ingiriisiga, ama in eray iswidhish ahi uu la mid noqdo eray kale oo ingiriisi ah.

Haddii dugsigu marka la qiimeeyo uu noqdo ka arday-ga ugu fiican ingiriisiga uu barto, ayaa arrintaas waxa go'aaminaya iyada oo lala tashanayo waalidiinta. Waalidka iyo ardaygaba waa in ay u caddaataa sida khasaarahaasi uu isbaddel ugu samayn doono fursadaha ardayga ee ah sidii uu waxbarashada dugsiga sare u sii wadan lahaa.

Fursadaha cusub ee sannaddada 2006-2007

- Hey'adda horumarinta dugsiyadu waxay bixisay sannaddadii 2006-2007 dhexdoodii kaalmo dhaqaale oo nashaad gelin ah oo la siinayo dugsiyada iyagu dadka ku marti qaadaya maaddooyinka lagu dhigayo afka hooyo isla markaa ay macallimiintaasi fursad u helayaan in ay dhammaystiran karaan waxbarashadooda si maaddooyin kala duwen ay ugu dhigi karaan luqaddooda afka hooyo.

- Intooda badan ardayda ku hadasha luqado badan waxa la siinayaa oo loo sii wadayaa in wax loogu dhigo afka iswidhishka. Sidaas awgeed ayey hey'addu ugu dadaalaysaa sidii ay nashaad u gelin lahayn sidii degmooyinka ugu marti qaadi lahaayeen sidii aqoontooda iyo xirfaddooda waayo aragnimo kor loogu qaadi lahaa macallimiintooda maaddooyinka ku dhiga afka iswidhishka. Ujeededa ama hadefku waxa weeyi in macallimiintaasi ay hore u mari lahaayeen habka wax dhigistooda si taasi ay jawaab fiican ugu noqoto waxyaabaha looga baahan yahay ardayda luqadda iswidhisku ay tahay luqwaddooda labaad.

* Ma waxaan ahay kun cagood leh hangaraarac iswidhish oo 100 cagood oo qudha soomaaliga ku leh?

In la sii caawiyo ardayda karaysa xisaabta



Maaddo kale oo muhiim ahi waa maddeda xisaabta. Arday badan oo ka mid ah ardayda dhawaan timid waddanka ayaa aqoon fiican u leh xisaabta, laakiin gaar ahaan ardayda mar dambe soo gashay dugsiyada hoose dhexe iyo dugsiyada sare ee iswidhishka sannaddo badan ayey qaadanaysaa inta aanay la qabsan waxbarashada noocan ah ee iswidhishka, oo ah sidii ay u fahmi lahaayeen buugaagta xisaabta ee iswidhishka ku qoran isla markaana ay af iswidhish ugu sharraxi kari lahaayeen sida ay u xallili lahaayeen xisaabaha ay ka shaqaynayaan.

Maanta intooda badan ardayda dhawaanta timid muddo dheer ayey xisaabta sugaan ilaa inta loo dhigayo fasalka diyaargarwoga ama koorasayada hordhaca ah ee loogu talo galay ardayda soo galeytiga. Mararka qaarkood waxa loo qaybiyaa si fudud (sida carruurta!). Tiro ay ka shaqaynayaan oo aan u baahnayn aqoon luqadeed oo xagga iswidhishka ah. Ardayda kale qaarkood waxay ku jiraan casharrada luqadaha iswidhishka iyaga oo aan qaadan karayn wax dhigista. Wax lala yaabo maaha in ardayda noocan ahi ay si khaldan wax u fahmaan markay ugu xuntahayna ay lumiyaan xiisihii ay qabeen iyo weliba xiisihii barashada afka iswidhishka.

Ardaydan waxa la go'aamiyey oo dan u ah, haddii ay sii wadi karayaan in ay sii korodhsadaan aqoontooda xagga xisaabta iyaga oo ku dhiganaya afkooda hooyo ama hore loo siiyo waxbarsho xagga luqadda ah iyada oo la barbar wado in ay bartaan luqadda iswidhishka.

Ma jiraan caqabadao rasmi ah oo diidaya in wax lagu dhigo luqado kale oo aan iswidhish ahayn, isla markaa shahaadadaha lagu bixiyo waxbarashada noocaas ahi waxay la qiima yihiin kuwa lagu bixiyo waxbarashooyinka iswidhishka.

Siday tahay xaaladda waxbarashada ee ilmahaygu? -Ma la caawin karaa? -Siday wax u dhaceen?

Wada hadalka waalidiinta lagula yeelanayo dugsiga
Dugsiga xannaanada carruurtu wuxu waalidiinta ku marti qaadaa wadahadal ku saabsan horumarka carruurta, sida carruurtu ay ula socon karayaan saaxiibadooda, heerka ay ka gaadheen barashada afka iyo horumarka xagga aqoonta. Waalidiintu waxay xaq u leeyihiin in ay helaan macluumaad iyo sida uu dugsiga xannaanada carruurtu uu u shaqeeyo isaga oo taageeraya carruurta luqadaha faraha badan ku hadasha labadooda jinsiyadood ama dhaqan iyo horumarka xagga luqadda. Shaqaalaha dugsiga xannaada ayaa sharraxaad ka bixin kara sida qoysku u taageeri karo horumarka luqadda ee marka la joogo guriga.

Wadahadalka horumarinta ee waalidiinta lagula yeesho dugsiga hoose dhexe
Dugsigu wuxu teeram kasta ardayga iyo waalidiinta ugu yeedhi doona wada hadal horumarin ah. Ujeeddeda wadahadalkaas laga leeyahay waxa weeyi:

- In ardayga iyo waalidiintuba ay helaan warbixin ku saabsan bal in ardaygu uu wax u bartay sidii looga baahnaa, waxa adag iyo waxa jilicsan. Waxa kale oo weliba wadahadalka lagu gorfeeyaa xaaladaha kale ee ardayga, sida ardaygu uu ula socdo ardayda kale ee saaxiibadiis ah, dadka waaweyn iyo kooxaha ama dadka kale.

- In dugsigu uu ogaado haddii ay qaadanayaa waayo aragnimda waalidiinta iyo fursadaha sidii ay ilmahooga uga taageeri lahaayeen horumarka xagga aqoonta. Waalidiinta oo xaggooda si firfircoon uga qayb qaata ayaa iyaga u suurta gelineysa in ay shuruud ku xidhaan dadaalada lagama maarmaanka ee looga baahan yahay xagga dugsiga.

- In macallimiinta, ardayda iyo waalidiintuba ay ku heshiiyaan waxa ardaygu uu baranayo isla markaana uu tababar ku samaynayo wakhtiga labaad iyo dadaallada looga baahan yahay dhicana dugsiga. Waxa kale oo weliba lagu heshiin karaan sida xagga guriga shaqada ardayga looga caawin karo.

Qorshayaasha horumarinta ee gaar ahaaneed
Iyada oo la tix raacayo wadahadalka horumarinta ardayga ayaa macallimiinta, ardayda iyo waalidiintu ay si wada jir ah u wada saxeexayaan qorshayaasha horumarinta ee gaar ahaaneed.

- Qorshe horumarineed oo gaar ahi wuxu ka koobnaanayaa dhowr hadef oo waxbarasho oo gaar ahaaneed oo ardaygu uu gaadhi karo ilaa inta laga gaadhayo wadahadalka horumarinta ee labaad, kolkaas oo lagu heshiinayo qorshe horumarineed oo gaar ah oo cusub.

- Qorshe horumarineed oo gaar ah oo loogu talo galay carruurta da'da yar leh wuxu marka hore u hor seedayaa aqoon googol dhig ah oo dhammaystiran sida akhrinta, qorista iyo tirinta ama xisaabinta. Iyada oo la eegayo da'da ilmaha oo weynaanaysa ayaa isha aad loogu haynayaa sidii horumarka aqoonta googol dhig looga dhigi lahaa maaddooyinka kala duwen.

Iyada oo la deegsanyo qorshayaashan horumarinta ayaa dugsiga iyo gurigub si joogta ah ay u raacayaan arday kasta horumarka cilmigiisa. Ujeeddeda laga leeyahay dadaalladan la samaynayo ee lagu heshiinayaa waxa weeyi in arday badani ay gaadho hadefkii laga lahaa aqoonta dugsiga.

Warbixn dheeraad ah waxaad ka helaysaa buugaagta *Talooyinka guud iyo warbixinaha ama faallooyinka - qorshaha horumarinta ee gaar ahaaneed (Allmänna råd och kommentarer - Den individuella utvecklingensplanen).*

Xuquuqda qofku u leeyahay in turjumaan loo qabto
Haddii macallimiintu aanay fahmi karayn iswidhishka, dugsiga ayaa kolkaas eegaya in turjumaan uu jiro marka wadahadalkaas la samaynayo. Ardayga turjumaan ahaan looma isticmaalayo marka dugsigu uu guriga la xidhiidhayo.

Shahaadedda iyo qiimayn qoraal ah

Qorshayaasha waxbarashada ee dugsiyada hoose dhexe iyo dugsiyada sare waxa ku jira maaddooyin lagu takhasuso oo ah sidii ay mkacallimiintu u qori lahaayeen shahaadadaha. Waxa jira go'aanno qaran oo laga soo shaqeeyey oo tilmaamaya aqoonta loo baahan yahay si ardaygu u helo shahaado gaar ah iyada oo la tixraacayo qorshayaasha u yaalla koorasyada waxbarashada.

Shaadooyinka dugsiga hoose dhexe waxa loo adeegsanayaa summadahan:

- Gudbay (Godkänd, G)
- Si fiican u gudbay (Väl godkänd, VG)
- Si aad fiican u gudbay (Mycket väl godkänd, MVG)

Ardayga gaadhi waaya hadefkii laga lahaa maaddooyinka kala duwen ee lagu dhigto dugsiga hoose dhexe wuxu xaq u leeyahay in la siiyo qiimayn qoraal ah oo ku saabsan horumarinta aqoonta ee maaddedda ama maaddooyinka markaas taagan. Qiimayntaas waxa kale oo weliba ku jiraya kuwa ay ahaayeen tallaabooyinkii taageero ee dugsigu uu qaaday.

Dugsiyada sare waxa lagu isticmaalaa xitaa shahaadooyinka

- Aan gudbin (Icke godkänd, IG)

Linkiyada iyo suugaanta

Linkiyada Internetka ee hey'adaha ee horumarinta dugsiyada *www.skolutveckling.se*

MÅNGFALD OCH LIKVÄRDIGHET (DHAQAN BADNAAN IYO ISKU QIIMA AHAANSHO)
Cinwaankan hoostiisa waxyaabaha ku yaal waxa ka mid ah bogaggan Internetka ee soo socda:

Nyanlända (DADKA DHAWAANTA WADDANKA YIMID)
Waxyaabaha loogu talo galay dugsiyada iyo kuwa kale ee ka shaqeeya carruurta iyo dhallinyarada dhawaanta waddanka timid.

Idéskola för mångfald (DUGSIGA FIKRADAHA EE DHAQAMADA BADAN)
Shabakad ka dhaxaysa dugsiyada xannaanada iyo dugsiyada kale ee caadiga ah ee doonaya in ay hore u mariyaan fikradaha ku saabsan sidii hore loogu mkarin lahaa arrimaha faraha badan leh.

Regeringsuppdrag (SHAQADA DAWLADDA)
Linkiyada ay ka mid yihiin qorshayaasha faraha badan ee sannadada 2006-2007. Natiija fiican farqiyadii oo hoos u dhacay- qorshaha loogu talo galay shaqada faraha badan.

Utvecklingsdialoger (WADA XAAJOODYADA HORUMARINTA)
Waxay ka kooban yihiin tusaale ahaan liiska ay ku qoran yihiin 30 degmood oo ka qayb qaadanaya taageerada nooceedu yahay wada xaajoodyada ee sannaddada 2006-2007 dhexdooda.

Tema Modersmål (MAWDUUCA AFKA HOOYO)
Taageero loogu talo galay dhammaan dadka ka shaqeeya daryeelka carruurta iyo dugsiyada. Waxay ka koban yihiin oo ku jira: "qolka luqadda" oo loogu talo galay qiyaastii 30 luqadood, warbixin googol dhig ah oo ku saabsan wax dhigista, wararka, doodaha, linkiyada loogu talo galay wixii warbixin ah ee Ku saabsan cilmi baadhista, koorasyada waxbarasho ee dadka lagu marti qaadayo shirarka iwm. Xitaa waxa ku jira linkiyada:

Qaamuusyada Lexin – lexikon online ee (albaaniga, carabiga, boosniga, ingiriisiga, fiinishka, giriigga, kuruwaashiga, seerbiga, isbaanishka, turkiga iyo erayada iswidhishka oo sidii loogu dhawaaqayeyna cajalad lagu duubay)

Sawirrada qaamuuska Lexin – waxay ka kooban yihiin qiyaastii 1700 oo magac (oo wata sawirro, qoraal iyo dhawaaq af iswidhish ah, waxa socota sidii luqado badan loogu turjumi lahaa)

Filimka qaamuuska Lexin – wuxuu ka kooban yahay 370 fal (waa filim yar oo gaaban oo wata cod iswidhish ah)

KUNSKAP OCH BEDÖMNING (AQOONTA IYO QIIMAYNTA)
Cinwaanka hoostiisa waxyaabaha ku yaal waxa ka mid ah bogagga Internetka ee soo socda:

Bedömning och betyg (QIIMAYNTA IYO SHAHAADEDAHA)
Individuella utvecklingsplaner (QORSHAYAASHA HORUMARINEED EE GAARKA AH)
Läs och skriv (AKRI oo QOR)
Matematik, naturvetenskap och teknik (XISAABTA, FARSAMADA IYO SAYNISKA)
Skolbibliotek (RUGTA KUTUBTA EE DUGSIGA)
Språk (LUQADDA)

BÖCKER OCH BROSCHYRER (BUUGAAGTA IYO WARAAQAHA YARYAR)

Warbixinahan iyo waraaqahan waa la akhriyi karaa, la soo koobbiyesan karaan ama waxa laga iibsan karaa bogga Internetka ee www.skolutveckling.se/publikationer

Två språk eller flera? Råd till flerspråkiga familjer (waa 28 bog). Waxa laga helayaa iyada oo ku qoran luqadaha iswidhish, albaani, carabi, boosni, ingiriisi, fiinish, woqooyiga kurddi, roomaani, aril iyo lovara, iiraani, boolish, ruush, soomaali, isbaanish, tigriini, taylaandis iyo turki. Halkan ayey waalidiintu kaga jawaabi karaan su'aalahooga ay hayaan ee ku saabsan sidii ay u haysan lahaayeen luqadooda qoyska ay kaga hadlaan iyo sidii ay u taageeri lahaayeen luqadda carruurtooda iyo horumarka xagga aqoonta.

Komma till tals Flerspråkiga barn i förskolan, 2004tii (Waa qaab yar oo ah 60 bog). Ujeeddeda macluumaadkaas laga leeyahay waxa weeyi sidii loo taageeri lahaa kor u kaca aqoonta ku saabsan luqadaha badan ee ay ku hadlaan carruurta yaryari loona taaageeri lahaa korna loogu qaadi lahaa.

Vid sidan av eller mitt i? 2005tii (waa 70 bog) Waa qoraal loogu talo galay degmooyinka iyo dugsiyada oo qeexaya arrimaha khuseeya shaqada hore loogu marinayo ardayda dhawaan waddanka timid isla markaana kor u qaadaysa su'aalaha lagaga fikirayo mustaqbalka ee ku saabsan qofku howlihiisa uu qabsanayo.



MATERIAL FRÅN SKOLVERKET (QORAALKA AMA MACLUUMAADKA ay soo saarto hey'adda Dugsiyadu)

Qoraalkaas waa la akhriyi karaa, la koobbiyeysan karaa ama waxa laga iibsan karaa *www.skolverket.se*

KURSPLANER OCH BETYGSKRITERIER I GRUND- OCH GYMNASIESKOLAN (QORSHAYAASHA KOORASYADA WAXBARASHO IYO HEERARKA SHAHAADEDAHA EE DUGSIYADA HOOSE DHEXE IYO DUGSIYADA SARE)

Flera språk – fler möjligheter, 2002tii (waa 304 bog). Shaqo ay dowladdu bixisay waxay hey'adda Dugsiyadu ku qorshaysay taageerada la siinayo afka hooyo ee dugsiyada xannaanada iyo dhigista afka hooyo. Warbixintani xitaa waxay ka kooban tahay lifaaqyada: Mowqifyada dhigista afka hooyo iyo is-dhexgalka dadka, dulmar lagu sameeyey cilmi baadhis iswidhishku ku sameeyey dhigista afka hooyo, soddon sannadood oo afka hoyo ah – taageeradii afka hooyo ee sannaddadii 1970-2000.

Flera språk – fler möjligheter, 2003tii (waa 16 bog). Qayb gaaban oo ka mid ah warbixinta xagga sare ku qoran, xitaa waxa la helayaa iyada oo ku qoran afka ingiriisiga.

Språket lyfter – lärarhandledning, 2002tii (waa 27 bog). Qoraal tijaabo ah oo ku qoran afka iswidhishka, iswidhishka oo sidii afkaaga labaad ah iyo afka hooyo oo ka horreeya sannad dugsiyeedka 6.

Språket lyfter – observationsschema, 2002tii (waa 3 bog). Waa la adeegsan karaa iyada oo aan luqad ku xidhnayn.

Allmänna råd och kommentarer Den Individuella utvecklingsplanen, 2005tii. Talada hey'adda dugsiyada iyo faallooyinka loogu talo galay in lagu aasaaso qorshayaasha horumarineed ee gaar ahaaneed ee loogu talo galay dhammaan ardayda.

Iswidhan waxay u baahan tahay dad luqado badan ku hadla

Luqadaha badani waxay keenaan fursado badan!
Iyada oo luqadda la adeegsanyo ayeynnu cabbirnaa dhaqnakeenna iyo qiimaynteenna. Luqaddu waxay inna siisaa dareen isku kalsooni ah. Luqaddu waxay sidda aqoonta waxayna sal u tahay kulanka lala kulmayo dadyowga kale. Waxaynnu u baahan nahay luqad si aynnu u fikiri karno, u hinddisoonno, u haybayno arrimaha ama su'aalaha una xallilno dhibaatooyinka.

MYNDIGHETEN FÖR
SKOLUTVECKLING